

Daryeelka Caafimaadka ee Ontaariyo: Bilaabidda

Haddii aad ku nooshahay gobolka Ontaariyo ama aad qorshaysatay in aad wakhti dhaw u soo guurtid, waxaa laga yaabaa in aad qabtid su'aalo ku-saabsan sida aad gargaar caafimaad u heli karaysid. Haddii ay xaaladdadu sidaas tahay, waxay tani noqonaysaa meel muhiim ah oo aad ka-bilaabi karaysid. Waxaad jawaabo u heli doontaa dhammaan su'aalaha ku-saabsan daryeelka caafimaadka ee ay soo jeediyaan dadka ku nool gobolka Ontaariyo. Waxaanu xogta isugu keenay labada qaybood ee waa-weyn ee hoos ku-qoran:

- Arrimaha ku-saabsan habka daryeelka caafimaadka ee ka jira gobolka Ontaariyo
- Sida aad ugu biiraysid iyo sida aad u bilaabisay helitaanka gargaarka caafimaadka

Waxad xaashidan xaqiiqada oo luuqado badan ku-diyaarsan aad ka heli kartaa shabakadda internet-ka ee uu ciwaankeedu yahay ontario.ca/healthcarebasics. Waxaad dhag ka-siisaa (Click) furaha "Information in Other Languages". Waxaa kale oo aad naqshadda internet-ka ka-baran doontaa sida aad xannaano caafimaad ugaga heli kartid gudaha Ontaariyo.

Arrimo ku-saabsan habka daryeelka caafimaadka ee ka jira gobolka Ontaariyo

1. Yaa bixiyo lacagta adeegga daryeelka caafimaadka ee laga bixiyo gobolka Ontaariyo?

Haddii aad ku nooshahay gobolka Ontaariyo, adeegyada caafimaadka ee aad u baahan-tahay waxaa intooda badan lagu bixiyaa kharashka dadweynaha. Wuxuu taas macnaheedu yahay, waxaa dhammaan ama qayb ka mid ah kharashkaaga caafimaad bixinaysa dawladda. Waxaa adeegyada ka mid ah:

- baadhitaanada ay kugu samaynayaan dhakhtargaaga qoyska iyo dhakhaatiirta takhasuska leh
- adeegyada aasaasiga ah iyo kuwa gurmada deg-degga ah ee dareeylka caafimaadka oo ay ka mid yihiin qalliinka iyo jiifka cusbitaalka.

Si loo-bixiyo lacagta adeegyadaasi lagu helayo, gobolka Ontaariyo wuxuu diyaariyey Ontario Health Insurance Plan. Dadka reer Ontaariyo waxay intooda badani ay caymiskaasi ugu yeedhaan magiicisa oo la soo koobay oo ah: OHIP. Marka dadka Ontaariyo daggan ay canshuuraha bixiyaan, waxaa qayb lacagtaasi canshuuraha ka tirsan lagu shubayaa qorshaha caymiska caafimaadka ee lagu bixiyo kharashka adeegyada caafimaadka. Si aad OHIP ugaga faa'iidayatid, waxaad u baahan-tahay in aad caymiskan ku biirtid. Kaddibna dhakhaatiirta iyo adeeg-bixiyayaasha kale ee caafimaadka ayaa lacagta ay kuugu adeegeen ka-qaadanaaya OHIP.

Talo: *Haddii aad xaq u yeelan-waydid OHIP, waxaa qasab noqonaysaa in aad iska-bixisid kharashkaaga caafimaadka muddada gobolka Ontaariyo joogtid. Ama, waxaad raadsan kartaa iibsashada caymiska caafimaadka ee khaaska ah. Si uu caymiska caafimaadka ee khaaska ahi uu u daboolo qaar ka mid ah kharashyadaada daryeelka caafimaadka, waxaa jiraysa lacag aad bil-walba siinaysid shirkadda caymiska caafimaadka ee khaaska ah.. Xataa haddii aad u qalantid OHIP, waxaad isticmaali kartaa shirkadaha caymiska ee khaaska ah si ay u bixiyaan adeegyada caafimaadka ee ayna OHIP lacagtooda bixin.*

2. Yaa lacagta siiya Ontario Health Insurance Plan (OHIP)?

OHIP caymis caafimaad oo ay maamusho dawladda gobolka Ontaariyo. Caymiskani wuxuu ku-hawlgalaa lacag ka soo go'da canshuuraha laga qaado dadka ku nool gobolkaasi Ontaariyo iyo meheradaha gobolka ka jira.

3. Maxay yihiin adeegyada caafimaad ee uu Barnaamijka Ontario Health Insurance Plan (OHIP) uu lacagtooda bixiyo?

OHIP waxay bixisaa lacagta adeegyada caafiimaadka ee aasaasiga ah iyo adeegyada gurmada deg-degga ee aad gobolka Ontaariyo ka heshid intooda badan – waa haddii ay yihiin kuwo aad sababo caafimaad ugu-baahan-tahay. Waxay shaxda hoos ku-qoran ay soo koobaysaa adeegyada aad ka heli karaysid dhinaca OHIP:

Adeegyada ay OHIP lacagtooda bixiso:	Adeegyada ayna OHIP lacagtooda bixin:
<ul style="list-style-type: none">• Adeegtada caafimaadka aasaasiga ah iyo gurmada deg-degga ee aad gudaha Kanada ka heshid intooda badan - waa haddii ay yihiin kuwo aad sababo caafimaad ugu-baahan-tahay• Qaar ka mid ah adeegyada gurmada deg-degga ah ee aad heshid adiga oo meel Kanada dibadda ka ah. Waxaa jira shuruuc ku-saabsan muddada aad dalka ka-maqnayd	<ul style="list-style-type: none">• Adeegyada aanan baahida loo-qabin ee sida qalliinka la isku-qurxinayo• Dawooyinka warqadda amarka dhakhtarka, dayeelka ilkaha iyo baadhitaanada indhaha• Adeegyada daryeelka guriga dhexdiisa, aanbalaas iyo daryeelka wakhtiga dheer soconaya ee laga bixinayo gobolka Ontaariyo dibaddiisa

Sida aad ugu-biiraysid ee aad u bilaabaysid helitaanka gargaarka caafimaadka

4. Miyaan codsan karaa daryeelka caafimaadka ee loo-marro dhinaca Ontario Health Insurance Plan (OHIP)?

Si aad u codsatid OHIP, waxaa waajib kugu ah in aad 'haa' kaga jawaabtid saddexda su'aalood ee hoos ku-qoran:

- Hoygaaga ugu-weyn ama goobtaada dagganaashuhu miyey tahay gudaha gobolka Ontaariyo?
- Lixdii bilood ee ugu horeeyay ee aad ku noolayd gobolka Ontaariyo, muddadii aad gobolka ka maqnayd miyey ka-yarayd 30 maalmood?
- Muddada -kasta oo 12 bilood ahayd miyaad gobolka Ontaariyo joogtay wakhti dhan ugu yaraan 153 maalmood?

Waxaa jira xaalada kale oo la-dhaqan-gelinayo. Tusaale, haddii aad:

- qof marti ah ama aad dalxiisid u timid
- ku-dhacwoonaysid qaxootinimo lagu ogolaado
- muddo -kasta oo 12 bilood dhan aad gobolka Ontaariyo ka-maqnayd in ka-badan 157 maalmood
- 183 maalmood ee ugu horeeyay ee aad Ontaariyo joogtay aad gobolka ka-maqnayd muddo ka-badan 30 maalmood
- tahay arday ajnabi ah, mararka qaarkoodna haddii shaqaale ajnabi ah

Xaq uma yeelanaysid OHIP Xog dheeraad ah oo ku-saabsan qofka OHIP codsan kara waxaad ka heli kartaa shabkadda internet-ka.

Talo: Haddii aad gobolka Ontaariyo ku cusubtahay, ka-hor intaanad bilaabin in aad ka-faa'iidayatid kharashka adeegga caafimaadka ee ay OHIP bixinayso, waxaa jira saddex bilood oo wakhtiga sugitaanka ah. Iyada oo ay arrintu sidaas-tahay, waxaa haddana fikrad wanaagsan noqonaysa in isla-markaad soo gashid aad xeraysatid codsiga karaka OHIP-ga. Si aad muddada sugitaanka aad adeeg u heshid, waxaad iibsana kartaa caymis shirkadaha khaaska ah.

5. Sideen u xeraysan karaa Codsiga Ontario Health Insurance Plan (OHIP)?

Waa in aad codsigaaga toos ugu xeraysatid xafiiska kugu dhaw ServiceOntario.

Si aad u codsatid, waa inaad:

- Si aad isku-diiwaan-gelisid adeegga Caymiska Caafimaadka ee Ontaariyo waxaad **Buuxisaa Foom-ka** 0265-82. Nuqulka foomkan waxaad ka heli kartaa xafiiska ServiceOntario. Ama waxaad nuqulka foomka ka qaadataa shabakadda internet-ka.
- Si aad u muujisid qofka aad tahay waxaad soo gudbisaa dukumeentiyada asalka ah, waxaad caddaysaa in aad ku nooshahay gobolka Ontaariyo, waxaanad muujisaa in aad tahay qof buuxinaya shuruudaha socdaalka (immigration).

6. Markaan u baahdo in gargaar ka helo habka daryeelka caafimaadka ee Ontaariyo maxay tahay in aan sameeyo

Marka aad doonanaysid gargaar caafimaad waa in aad soo bandhigtid kaarkaaga caafimaadka ee Ontaariyo. Kaarku wuxuu caddaynaya in aad xaq u leedahay in uu Ontario Health Insurance Plan (OHIP) uu kaa bixiyo lacagta daryeelka caafimaadka ee lagu siinayo. Kaarka waxaad helaysaa marka aad caymiskaasi daryeelka caafimaadka ku biirtid. **Waa in aad kaarkaaga marwelba haysatid.**

Waa in aad xaggee ka heshid gargaarka? Taasi waxay ku xidhan-tahay kolba nooca gargaarka ee aad u baahan-tahay. Shaxda hoos ku qoran waxay soo koobaysaa noocyada daryeelka caafimaadka ee aad ka-dex-xulan karaysid.

Fursadda daryeelka caafimaad	Muxuu yahay...	Goormaad u baahan karaa ...
Telehealth (1-866-797-0000)	Adeeggan taleefoonku waa mid bilaa lacag ah oo asturan. Waxaad Si aad u heshid talo caafimaad ama xog caafimaad oo guud, waxaad wici kartaa Kal-kaaliye Caafimaad oo Diiwaan-gashan.	Dharaar iyo habeenba xil-kasta oo aad gargaar u baahatid si aad uga go'aan gaadhid waxaad samayn lahayd: <ul style="list-style-type: none"> ▪ in aad gurigaaga dhexdiisa aad iskaa isku-daryeeshid ▪ in aad dhakhtarkaaga ballan la-yeelatid ▪ in aad rug caafimaad tagtid ▪ in aad la-xidhiidhid adeeg bulsho ▪ in aad tagtid qolka gurmada deg-degga ee cusbitaalka

Fursadda daryeelka caafimaad	Muxuu yahay...	Goormaad u baahan karaa ...
Dhakhaatiirta iyo adeeg-bixiyayaasha kale ee caafimaadka qoyska	Waxaa kuwan ka mid ah dhakhtarkaaga iyo kal-kaaliyayaashaaada caafimaadka qoyska. Waxay culayska saarayaan dawaynta qoyska, baadhitaanka iyo dawaynta cudurada, ciladaha caafimaad ee jidhka iyo dhaawacyada ay qabaan bukaanada ee da'doodu heer welba taagan-tahay.	Marka aad u baahatid gargaarka dhinaca xaaladaha aan gurmada deg-degga ah u baahnayn.
Kooxda Caafimaadka Qoyska	Kooxda Caafimaadka Qoysku waxay isku-keentaa shaqaale caafimaad oo kala-duwan oo bukaanada diiwaan-gashan siin kara dayreel caafimaad oo ay tayadiisu gaadhsiisan-tahay heerka ugu sareeya ee la-awoodi karo. Waxaa kooxaha ka mid ah kal-kaaliyayaal caafimaad iyo xirfadlayaal caafimaad oo kale oo si wada-jir ah u bixinaya fursado kala-duwan oo daryeel caafimaad ah.	Marka aad u baahan-tahay daryeel caafimaad oo aan ahayn gurmada deg-degga ah.
Rugaha Caafimaad ee Kal-kaaliyaha Caafimaad ee Guud	Waxaad rugahan caafimaadka ka heli kartaa daryeelka caafimaad ee aasaasiga ah, waxaanad ka-baran kartaa arrimo ku-saabsan nabad-qabka iyo ka-hortagga cudurka. Waxaa kale oo aad rugahaasi caafimaadka ka heli kartaa adeegyada iyo barnaamijyada bulshada ku-salaysan ee aad u baahan karaysid.	Haddii aanad lahayn dhakhtar qoys oo aad u baahan-tahay daryeel caafimaad oo aasaasi ah.
Xarumaha Caafimaadka Bulshada	Xarumahani waxay shakhsiyaadka, qoysaska iyo bulshooyinka u fidiyaan barnaamijyada caafimaadka iyo horumarinta caafimaadka.	Marka dhibaatooyinka la mid ah kuwa sida hoos ku qoran ay kugu adkeeyaan helitaanka daryeelka caafimaadka: <ul style="list-style-type: none"> ▪ luuqadda ▪ dhaqanka ▪ dhibaatooyin dhinaca laxaadka ▪ guri la'aan ▪ saboolnimo ▪ goobaha oo aad u fog
Rugta Caafimaad ee saacadaha shaqada kaddib shaqeeya	Rugtan waa mid cusbitaalada ka-baxsan oo aad ka heli kartid adeegyada fudud ee dhibaatooyinka caafimaad ee aan	Marka aad u baahatid in daryeel caafimaad lagaa siiyo xaalado aan gurmada deg-degga ah u baahnayn.

Fursadda daryeelka caafimaad	Muxuu yahay...	Goormaad u baahan karaa ...
	gurmada deg-degga ah u baahnayn. Saacadahooda shaqaduna waxay sida qaalibka ah socdaan illaa saacadaha danbe ee fiidka iyo maalmaha nasashada ee toddobaadka. Sida qaalibka waxaad rugahan caafimaadka tagi karta adiga oo aan ballan qabsan.	
Xarunta Daryeelka Caafimaadka Deg-degga ah	Xarumaha Caafimaadka ee Deg-deggu waxay maalinimada, fiidkii iyo maalmaha nasashada ee toddobaadka daweyaan dhibaatooyinka caafimaad ee nafta halis ku ahayn. Waxay xarumahani bixin karaan dhammaan noocyada kala-duwan ee adeegyada ee ka-baxsan dawaynta qalliinka.	Marka aad u baahatid daryeel caafimaadka carruurta ama dhibaatooyinka yar-yar ee aan murugsanayn ee aan gurmada deg-degga ah u baahnayn. Tusaalooyin: dhacwayada indhaha soo gaadha, boogaha, jabitaanka gacmaha iyo lugaha, Baadhitaanada raajitada iyo baadhitaanada shaybaadhka.

7. Waxaan qaba su'aalo ku-saabsan isticmaalka habka daryeelka caafimaadka ee ka jira Ontaariyo. Yaan wici karaa?

La-xidhiidh ServiceOntario, INFOLine inta u dhaxaysa 8:30 aroornimo illaa 5:00 galabnimo. Shaqaaluhu waxay diyaar u yihiin in ay kugu caawiyaan luuqadda Ingiriisiga, Fransiiska iyo 20 luuqadood oo kale. Soo wac:

- 1-866-532-3161
- TTY 1-800-387-5559
- Gudahaoronto, TTY 416-327-4282

Waxaad xog dheeraad ah ka heli kartaa health.gov.on.ca